Wikileak warbaa ku dhanee

Yaaney ina kala weecin:

Bahda Mareegaha Farsahxan

Luulyo 8, 2015 (Rabadaan 20, 1436)

Mareegta warbaahineed ee WIKILEAK ayaa intay jirtay dadweynaha iyi wargeysyaduba u bogeen, halka dawladuhu aaney ku badhaadhin jiritaankeeda. Waxaa albaabada loo furay gu'gii 2007 si rasmi ah. Ujeedada ugu weyn ee loo aassaaey waxay aheyd in xogaha dawladuhu bulshadooda ka qarinayaan ay noqdaan kuwo bulshadu ogaato, kuna hawlgasho.

Tunisia ayaa ahaa wadamadii ugu horeeyey ee ay xoggo badan ka soo saareen markii dawladii Cali ay kuu raaxeysatey xoolihii bulshada, halka bulshadii nolol maalmeedka caadiga ah hanan kari wayday . Geesigii Maxammed Bu'asisi(IHUN) ayaa Bishii Diisambar 10dii,2010kii fuliyey falkii unkay kacdoonka hogaamiyayaashii Carabta ka kala daadiyey xoolaha aaney laheyn ee ay isa siiyeen. Iyaduba waa wax ku qaadasho u taala qof kasta oo xoolo dadweyne maamule looga looga dhigo.

Dhimashadu xaq weeyoo halyey geeri loo dhalaye

Alleylehe dhabbaad jeexdayoo qaaday dhacantiiye

Dharaaraba adoon mootanayn dheelmay Caligiiye - *Zine El Abidine Ben Ali*

Carabtii miyey wada dhameen dhiilka cadhadaada?

Dhallintiyo barbaartii miyaad ciilka dhaxalsiisay?

Dhacdadiyo shilkaagii miyey dhaharo naafeysay?

Siday kuugu dheeleen miyaa loogu dhagax qaaday?

Dhamacdiyo dabkaagii miyaa uunku ku dhalaalay?

Tuunis dhimbiishii miyey dhaaftay kana dhooftay?

Beri dhexiyo suudaan miyaa jiifka laga dhaartay?

Saw dogobyo lama sii dul dhigin dhuxushii aad oogtay?

Shacabkii dhufaanaa miyuu caawa dhumuc yeeshay?

Dhul-gariirkii Qaahira miyuu dhoosha ka higgooday?

Taxriir, Abwaan Xasan Daahir Weedhsame 11/febuary/ 2011

Mareegta WIKILEAK waxay noqotay gole dadku aad u booqdaan, in lagu caweeyana aad loo doorbido. Dhaxamaha dawladaha wax qarsada ayey uga tahay kul lagu diirsado. Sidoo kale ayey indhaha aduunka u soo jeedisay in dawladaha aad loogu fiirsado falalkooda, kol haddii intay sheegayaaan ka yar tahay intay qarinayaan. Socdaalada golaha dawladu dibadda ugu baxdo ayey WIKILEAK indhaha bulshada u soo jeedisaa, una soo bandhigtaa heshiisyada qarsoon, iyo kulamada qarsoon ee ay galayaan. Dantii ummadana waanu ka hadlnay bay leeyihiin waxna way qarinayaan. Waa baahida keentay in bulshadu ugu boholyowdo uguna dhago-nuglaato dhawaaqa ka soo yeedha WIKILEAK.

Dhawaan ayaa baahiyey inay WIKILEAK daaha ka rogtay heshiis ay dawlada Soomaaliland la gashey Dawlada federaalka ee Soomaaliya io dawlad goboleedka Puntland. Waxaa warkaa ay WIKILEAK ka soo daldashey qolka kayda ee Arimaha dibada ee dawlada Sucuudiga. Sida la sheegay waxaa warka gudbiyey xubnaha ka shaqeeya safaarada uu Sucuudigu ku leeyahay magaalada Muqdisho ee ah xarunta Dawlada Federaalka ee Soomaaliya. Warku inta Soomaaliland arimaheeda soo faragelinaysaa wuxuu u dhacey sidan:

٢. وقعت الحكومة الانتقالية الصومالية وحكومتي جمهورية (أرض الصومال) و سلطة إقليم (بونت لاند) وعدد من الميليشيات الموالية للحكومة الصومالية في تاريخ (١٤٣٣/٣/٢٦هـ) الموافق (٢٠١٢/٢/١٨م) إتفاقاً يتضمن تأسيس برلمان جديد بمجلسين ، بالإضافة إلى إعداد دستور يسمح بنظام فيدرالي.

"An agreement which would pave the way to two parliamentary houses, and drafting of federal constitution was signed by Somalia's transitional federal government, Puntland, Somaliland and pro-government militias on February 18, 2012," read the Saudi cable.

Warku wuxuu sheegayaa in heshiis wado u jeexaya sidii loo samayn lahaa gole Baarlamaan oo ka kooban laba gole iyo saameynta Dastuurkii Feraalka ay wada saxeexdeen Dawlada Federaalka, Puntland, Somaliland, iyo kooxo raacsan xukuumada Federaalka ah bishii Febraayo 18, 2012. Waxaana lagu raadraacey inay sidaa qoreen War-hoosaad gubiyihii Sucuudigu.

Markaad si xeeldheer u eegto warka uu qoraalkani gudbinayo ma sugayo haddey jirto qofka u saxeexay dawlada Soomaaliland iyo kuwa kaleba. Wuxuu u sheegayaa dhacdada sidii war ahaaneed.Waxay u egtahay sida ka muuqata in ay tahay warbixin ay safaarada Sucuudiga ee Xamar u gudbinaysay wasaarada arimaha dibada ee Sucuudiga.

Dawlada Soomaaliland xidhiidh sokeeye oo sidaa u qoto-dheer oo ka dhexeeyaa ma jiro inta laga war hayo dawlada Sucuudiga. Sidoo kale ayaa mucaaridkuna xaq u leeyihiin ilaalinta hawlgalada qarsoon ee dawladu golaha madow la gasho. Horaana loo yidhi " Maxaa habeenkii sacabka loo tumaa, haddaan wax la qarinayn".Dhaqan bay u noqotay dawladan iyo kuwii ka horeeyeyba inay wuxuun qariyaan, wareysi diidaan, shir- jaraarid qabtaan, iwm. Tani waxay dadka ku keentay sas iyo didmo in laga qaado loona nuglaado wixii kasta ee dawlada laga sheego inay qarinayso. Sidoo kale waxaa tuhun keeni kara madaxweynaha Soomaliland Axmed Maxamed Siilaanyo oo la hadal hayey dhawaanahan inuu u socdaalayo dalkaa Sucuudiga.

Waxaase aad moodaa in arimo badani si aan la filayn u dhaceen, aadna looga wanaagsanaa. Mucaaridka oo warkaba aan shaandheyn, dawlada oo is-difaac uun taladeedu noqotay oo ilaaway inay xilkay sidaan gal-daloolo uu leeyahay ay keentay in la tuhmo, Shakhsiyaad is weerarey oo nabarkay isku geysteen is xasuusiyey, iwm. Iyadoo lagu jiro bishii Rabadaan ee qof kastaba ay aheyd inuu kheyrka raadsado, xumaha ka dhawrsanaado ayaa waxaa habooneyd in la kala roonaado, arintana si qurux badan looga wada hadlo:

Kaadida dameerkiyo,

Hadduu daamur kaa kale,

Dusha uu iskaga shubay,

Adiguna tu doofaar,

Isku daadi kuma odhan,

Xumo xumo ku daahiri,

Yaan doodda laga dhigin,

Dirsooc, Ibraahim Gadhel(IHUN)

Mucaarid iyo Maxaafid waxay tahay in laga wada sinaado u heelanaanata danta guud.Waa laga yaaba a in si kala duwan loo arki karo ama loogu hawlgali karo, hase yeeshee in isla eego maxaa khaldamey; warka soo kordhay muxuu sidaa; Halkuu warku ka soo baxey; Yaa cadeyn kara jiritaankiisa.

Markaa ka dib la shaandheeyo. Waxaad moodaa in cadaawada mucaaridka iyo muxaaidku isku hayaan si fudud looga faa'iidaysan karo siiba cadawga faraha badan oo aan marna wanaag la jeclayn dadka iyo dalka Soomaaliland. Waad ogaydeen wixii ka dhacey arintii Qaxootiga ka soo baqoolay Yemen oo mid kasta oo cadeystay ama hoosta ku qarsanayey cadaawadu uu soo haliilay.

Gu'gii 1957kii ayaa kooxihii u halgamayey gobanimada dalka iminka ah Jamhuuriyada Soomaaliland aad isugu jeesteen,aad isugu muuqdeen, dantii guudna meesha ka baxdey. Arintiina noqotay hebel hebel ka hor gee, koox koox ka hor gee,halkaana guul uu dareemay gumaysigii Ingiriisku. Markaas ayuu Abwaan Cali Sugule –Dun Carbeed- Ilaahay ha caafimaadiyee- tiriyeyy maansada ku suntana magaca "Hayaay". Abwaanku wuxuu eegay haddey dadku hadli lahaayeen maxay odhan lahaayeen kol haddii hogaankii ummadu ay isku jeedaan oo ay is-aflagaadayn iyo buuq u heelan yihiin. Wuxuu yidhi abwaanku isagoo afkii bulshada ku hadlaya:

Hayaay sida aan habeen ahey ayaa hoosaasida laygu hodayaa
Hayaay sidi nacab ii hiigaayo oo aan hiil waayey baan habranayaa
Hayaay Sida beel hayaameysa oo hir doog leh aragtaan hinqanayaa
Hayaay sida aar hunguri ka batey oo hilbana gaadayaan hubsanayaa
Hayaay sida geel haraad qaba oo hoo biyaha maqley baan handanayaa
Hayaay sida wacan anaa isku hayee halkii ii xun waan ka hadhayaa
Hayaan sida aan ahgaaga bidiyo horseedkayga waan hiigsanayaa

Qoraalkoo dhameystiran halka ka akhrista:

بسم الله الرحمن الرحيم

المملكة العربية السعودية
رئاسة الاستخبارات العامة
(١٠١)

سري
١

الرقم: .....
التاريخ: .....
المرفقات: .....
الموضوع: .....

المعلومات

أولاً: الوضع السياسي في (الصومال):

١. شهدت (الصومال) مؤخراً حراكاً سياسياً كبيراً تحقق خلاله الكثير من النجاحات على المشهد السياسي بدرجة أعادت ثقة الشعب الصومالي في الحكومة الحالية وقد لاقت الاجتماعات العديدة بين مختلف الأطراف والقرارات الصادرة عنها وخاصة خارطة طريق السلام الترحيب من الشعب الصومالي والمنظمات الدولية والإقليمية المهتمة بالشأن الصومالي.

٢. وقعت الحكومة الانتقالية الصومالية وحكومتي جمهورية (أرض الصومال) و سلطة إقليم (بونت لاند) وعدد من الميليشيات الموالية للحكومة الصومالية في تاريخ (٢٦/٣/١٤٣٣هـ) الموافق (١٨/٢/٢٠١٢م) إتفاقاً يتضمن تأسيس برلمان جديد بمجلسين، بالإضافة إلى إعداد دستور يسمح بنظام فيدرالي.

٣. أهم العقبات التي تعترض تحسن الوضع في (الصومال):

أ. انقسامات وخلافات أعضاء البرلمان:

تتكرر تلك المشكلة في البرلمان الصومالي حيث أن الحكومة غالباً ما تفشل في حل تلك الخلافات بتأييدها لجناح ضد آخر بانحيازها للجناح المؤيد لرئيس البرلمان، وهم أقلية الأعضاء، بينما تجاهلت الجناح الآخر صاحب الأغلبية وكذلك أيدت المنظمات الدولية والإقليمية الحكومة في ذلك إلا أن ما إستجد فيها مع استمرار الخلافات هو أن الجناح الرافض لرئيس البرلمان والذي سحب الثقة منه وعين رئيسا آخر، يهدد حالياً أنه مع بداية شهر (إبريل ٢٠١٢م) الموافق (جماد الأولى ١٤٣٣هـ) سوف يسحب الثقة من الرئيس وإسقاط الحكومة قبل نهاية فترة ولايتها. وقد أدى ذلك إلى عدم تمكن البرلمان من عقد جلساته بكامل عضويته فتسبب ذلك في تعطيل دور البرلمان كسلطة تشريعية في البلاد.

ب. ظهور خلافات بين ممثل الأمين العام للأمم المتحدة وبعض المسئولين الصوماليين:

يتهم بعض المسئولين الصوماليين ممثل الأمين العام للأمم المتحدة بتجاوز صلاحياته وإصدار أوامر لكبار المسئولين في (الصومال)، وأنه يحوّل بعضاً من أموال الأمم المتحدة المخصصة لـ(الصومال) إلى مصلحته الخاصة وصرف بعضها على أوجه لا تقرها السلطات الصومالية، وأحدث ذلك صدىً واسعاً في الشارع الصومالي.

Tixraac:

-Qoraalka WIKILEAK:
https://wikileaks.org/saudi-cables/doc63160.html

- Maansooyinka Qolka Kaydka Mareegaha Farshaxan

Diyaarintii iyo Qalinkii:

Fu,aad Sheekh

Bahda Mareegaha Farshaxan